

RAAJADA XINIINYAHA EE MRI DA

Bukaanka: _____ Taariikhda Balanta: _____

Waqtiga Imaanshaha: _____ subaxnimo/galabnimo

Goobta: Mankato Clinic
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

Fadlan soomar Xafiiska Diiwaangalinta kahor intaadan imaan miiska Raajada/Daawada Cariga ah.

Hadaadan awoodin inaad balanta ku timaado ama aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac (507) 389-8570.

Waa maxay Raajada Xiniinyaha ee MRI?

MRI xiniinyuhu waxay adeegsataa unugyada birlabta kushaqeeya si ay sawiro ugasoo qaado xiniinyaha. Majiro shucaac lasocda baaritaanka MRI.

Sidee ayaan ugu diyaar garoobayaa baaritaanka:

- Kahor intaadan iskuqorin baaritaanka, fadlan usheeg adeeg bixiyahaaga hadaad leedahay mid kamid ah waxyaabaha sosocda: qalabka wadna garaaca fududeeya, waayirada nerfaha maskaxda, qalabka cochlear/gudaha/dhexda dhagaha lagashado, dhaawaca xabad ama wax kumuday, dhaawac isha kaaga dhaca kaasoo kayimaada wax bir ah ama shay banaanka isha kasoo galay.
- Waxaan soojeedinaynaa inaad laxariirto shirkadaada caymiska kahor intaadan balansan baaritaanka si aad ufahanto waxa caymiskaagu kaabixin karo baaritaankaan.
- Fadlan sooxiro maryo jilican, oo raaxo leh oon lahayn jiinyeero, badhano ama waxyaabaha kale ee birta ah.
- Waa inaad iskabixisaa dhamaan waxyaabaha birta ah, cidiyaha birta ah, make-up-ka iyo jijimaha kahor baaritaanka. Hadaad leedahay ilko macmal ah waxaa lagaa codsan doonaa inaad iskasiibto baaritaanka kahor.
- Aad ayay muhiim utahay inaad ogaato in saxarada iyo aariyada kujirta dabadu ay keeni karaan in baritaanka natiijadiisa la fahmi waayo, taasoo keeni karta inaad baaritaanka kunoqoto.
- 24 aac kahor xiliga baaritaankaaga, qaado Ex-ax bokiska kujirta si aad uyarayso suurtagalnimada in baaritaankaan lagu cesho.
- 6 saac kahor xiliga baaritaanka, waxaad cabi kartaa mid kamid ah dareerayaasha sosocda ilaa markaad xarunta baaritaanka timaado: sharaabka miraha, qaxwada, biyaha, shaah ama pop/soodhada.

Waxa dhacaaya inta baaritaanku socdo:

- Kahor intaan lagu galin sawirka MRI, foomka baaritaanka badqabka MRI ayaa dib u eegis agu saaynayaa kadibna adigga iyo khabiirka sawirkaaha MRI kusaaraaya ayaa saxiixaaya.
- Kahor intaan baaritaanka lagu galin, fadlan iskuday inaad saxarada iyo aariyada iskasaarto.
- Waxaan lagaa codsanayaa inaad qaybta dhar badalashada gasho aadna iskasiibto waxkasta oo bir kasamaysan.
- Waxaan lagaa codsanayaa inaad kujiifato miiska iskaanka. Duub qaas ah ayaa lasaarayaa meesha udhaw aaga iskaanka lagaa marinaayo.
- Marka baaritaankaaga MRI biloowdo, waxaad maqlaysaa codad degdega ah oo isdaba joog ah kuwaasoo kasoo yeeraaya geesaha iskaanka. Waxaa lagu xirayaa qalab maqalka difaaca si lagaaga dhaga xiro dhawaaqa mashiinta.
- Aad ayay muhiim utahay inaad kadheeraato dhaqdhaqaaqa.
- Baaritaankaagu wuxuu qaadanayaa kudhawaad 60 daqiiqadood ilaa laga dhameeyo.

Tilmaamaha baaritaankaaga kadib:

- Baaritaankaga waxaa fiirinaaya oo akhrinaaya dhakhtarka Raajada 24 saac ee kuxigga baaritaanka kadib.
- Warbixinta kama danbaysta ah oo saxiixanayaa loodirayaa dhakhtarkaaga kuusoo diray iskaanka.
- Natiijooyinka ayaa laguusoo gudbinayaa marka lagaaro balantaada dabagalka ah. Hadaadan lahayn balan dabagal ah, dhakhtarkaaga ayaa qoraal kuusoo dirayaa ama taleefan kaasoo wacaaya shan ilaa todobo maalmood gudahood.